



Shirka Miisaaniyada Dugsiyada Dadweynaha Portland Lagu Qabanayo Muuqaal Baahiyaha: Maalinta Isniinta, bisha Juun 8

Bulshada Qaaliga ee PPS,

Golaha Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay martigalinayaa kulankii sanadlaha ahaa ee miisaaniyada kaasi oo lagu qabanayo habka muuqaal baahiyaha la iska arko, sidaas darteed xubnaha bulshadu muuqaal baahiyahaasi ayey ka maqli doonaan, iyada oo xitaa aynu ku jirno in dadku ay kala fogaadaan ayna lagama maarmaan tahay, sababtoo ah xanuunka COVID-19.

Isniinta soo socota waxaad kala socon doontaan fadhigaa miisaaniyada Kanaalka YouTube PPS. Halkan waxaa ku qoran faahfaahin ku saabsan:

Kulanka Shirka Miisaaniyada Muuqaal Baahiyaha

Isniin, Juun 8, 2020 | 6:00 p.m. – 8:00 p.m.

Waxaad si toosa uga daawan kartaa marka aad gujiso halkan:

<https://www.youtube.com/user/ppscomms/live>

Haddii aad xiiseyneyso in aad caddeyn ka dhiibato inta lagu gudo jiro shirka miisaaniyada, fadlan waxaad raacdaa faahfaahinta xaggan hoose.

Habeenimada Isniinta barnaamijka waxaa ku jiri doona iyada oo la soo bandhigi doona miisaaniyada la soo jeediyey ee sanad-dugsiyeedka 2020-21, iyo falanqaynta sida uu u saameyn ugu yeeshay miisaaniyada dakhliga gobolka ee hoos u dhacday, taasi oo aan maalgalineyno sanadka soo socda, iyo sidoo kalena sidii aan ugu dhaganaan lahayn Aragtidii iyo Mudnaantii Istaraatiijiyadeenii.

Miyaad jeceshahay inaad siiso caddeyn Golaha Waxbarashada taasi oo ah fariinta Guddoomiyaha Waxbarashada?

Fadlan waxaad ku soo dirtaa qoraal warcalintaaada oo ku saabsan miisaaniyada halkan budget2021@pps.net. Warcelinta qoraalka waxaa lala wadaagi doonaa Golaha Iskuulka iyada oo lagu qori doono [Shabakada Golaha Waxbarashada](#).

Haddii aad rabto in aad iska diiwaangaliso inaad bixiso caddeyn hadal ah (qofkiiba waxaa la siinayaa labo daqiiqo kaliya), waxaad wacdaa Kara Bradshaw oo aad kala xiriiri karto 503-916-3906 ama email publiccomment@pps.net. Marka la xaqiijiyo meeshaada, waxaad heli doontaa email ay la socdaan tilmaamihii aad raaci lahayd.

Waxaa kuu diyaar ah turjubaano inta ay munaasabadu socoto dhammaan luqadaha la taageero.
Wixii kale ee baahiya gaar ah, waxaad kala xiriiri kartaa Xafiiska Golaha Waxbarashada
schoolboard@pps.net.

Waxa aan rajeyneynaa in aad ku maqalno.

Dugiysada Dadweynaha Portland